| | |
|---|---|
| **Ku:** | **Macaamiisha Nidaamka Adeeg Bixinta Nidaamsan ee Daawada Medi-Cal** |
| **Ka:** | **Adeegyada Caafimaadka Dhimirka** |
| **Taariikhda:** | **Juun 1, 2025** |
| **Darajada** | **Buug Tusmeedka Macmiilka ee Isku Dhafan – Ogeysiiska Isbadellada Waawayn** |

Markii koobaad ee aad biloowday inaad hesho adeegyada barnaamijkeena, waxaa lagu siiyay nuqulka Buug Tusmeedka Macmiilka kaas oo sharxay dheefahaaga, sida aad ku helayso daryeel, kana jawaabay su'aalo ku saabsan nidaamka Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee Ismaamulka San Diego.

Nidaamkeena adeegga caafimaadka dhimirka ayaa loo laga doonayaa inuu macmiil kasta siiso ogeysiiska isbadel kasta oo wayn oo ku dhaca xogta ku qoran buug tusmeedka ugu yaraan 30 maalmood kahor taariikhda loo qorsheeyay inuu dhaqan galo. Hoos waxaad ka helaysaa dheef cusub lagu bixinaayo DMC-ODS taas oo la heli doono 30 maalmood gudahood kadib ogeysiiskaan.

**Farsamooyinka Daryeelka Caafimaadka ee dhaqanka**

- Farsamooyinka Daryeelka Caafimaadka ee dhaqanka ayaa la filayaa inay kor u qaadaan helitaanka daryeelka ilaalinaaya dhaqanka; taageerada awooda xarumahaan si loogu adeegso bukaanadooda; oo joogteeyo loona hayo caafimaadka; kor loogu qaado natiijooyinka caafimaadka iyo tayada iyo khibrada daryeelka; loona yareeyo sinaan la'aanta helitaanka daryeelka.
- farsamooyinka daryeelka caafimaadka dhaqanka ayaa biixya labo nooc oo adeegyada cusub: Adeegyada Daaweeyaha Dhaqanka iyo Caawiyaha Dabiiciga ah. Adeegyada Daweeyaha dhaqanka waxaa ku jira baxnaaninta muusiga (sida muusiga iyo heesaha dhaqanka, dheesha, durbaan garaacista), ruuxiyadda (sida xafladaha, ruuxiyaadka, daawo dhaqameedka) iyo haababka kale ee isdhexgalka. Adeegyada Caawiyaha Dabiiciga ah ayaa kaa caawin kara taageerada helitaanka, dhisida xirfadda dhimirka, maareynta nafta, iyo taageerada jugta maskaxda.

Ogeysiiskaan isbadellada waawayn ayaa sidoo kale laga heli karaa webseedka Dheefaha iyo Qoysaska ee Optum,
https://www.optumsandiego.com/content/SanDiego/sandiego/en/beneficiary_and_families.html

**Si aad u Hesho Xog Dheeraad ah:**

- La xiriir QIMatters.HHSA@sdcounty.ca.gov